

# Waa maxay WIDA Alternate ACCESS?

**WIDA Alternate ACCESS waa imtixaan la siiyo ardayda ku jirto fasalada K-12 kuwaas oo loo aqoonsaday sida ardayda af Ingiriiska oo leh curyaanimada garashada ugu muhiimsan.**

WIDA Alternate ACCESS waxay cabirtaa xirfadaha luuqada Ingiriiska ardayda ee Dhageysiga, Aqrinta, Hadalka, iyo Qorista.

## Muxuu canugeyga u qaataa WIDA Alternate ACCESS?

Canugaaga waxaa loo aqoonsaday sida bartaha af Ingiriiska taasoo ka dhigan inuu canugaaga yeelan karo adeegyada taageerada luuqada ee af Ingiriiska, oo dheeraad ku ah qaadashada fasalada kale. Ardayda af Ingiriiska waxay qaataan imtixaanka aqoonta luuqada af Ingiriiska sannad walba. Bartayaal badan oo af Ingiriis ah waxay qaataan ACCESS for ELLs mtixaanka. Sababta canugaaga u qaadanayo imtixaanka WIDA Alternate ACCESS ayay u badantahay sababoo ah

- Waxaa lagu aqoonsaday sida lahaanshaha curyaanimada garashada weyn.
- Macalimiintooda waxay u maleeyaan in WIDA Alternate ACCESS, taasoo bixisa taageero dheeraad ah iyo fursado ay kaga jawaabaan sheyada imtixaanada, ayaa si fiican ugu ogolaaneyso inay muujiyaan hormarinta xirfadahooda luuqada af Ingiriisiga.

## Aqoonta Luuqada Ingiriiska

Heerka aqoonta luuqada Ingiriisiga waa cabiraada meesha ardayda ay ugu jiraan nidaamka hormarka xirfadaha luuqada Ingiriiska ee looga baahanyahay inay ku galaan barashada tasmada oo af Ingiriis ah. Marka ardayda ay gaaraan heerarka ugu sareeya ee aqoonta luuqada Ingiriiska, uma baahna adeegyada taageerada luuqada si ay uga qeybqaataan barashada tasmada oo af Ingiriis ah.



## Sidee ayaa buundooyinka WIDA Alternate ACCESS loo isticmaalaa?

Imtixaamista waxay ka caawisaa in macalimiinta fahmaan haddii ardayda ay leeyihiin xirfadaha luuqada ee ay ugu baahanyihiin inay si buuxda uga qeybqaataan fasalka. Bartayaasha af Ingiriiska ee naafada ah waxay baran **karaan** luuqad adag iyo nidaamyada xiriirka. Macalimiinta canugaaga waxay isticmaalaan buundooyinka imtixaanka WIDA Alternate ACCESS iyagoo go'aansanayo sida ugu fiican ee loo baro canugaaga.

Buundooyinka imtixaankaayaa sidoo kale ka caawiyo macalimiinta inay la socdaan hormarka canugaaga ee waxbarashada tacliinta af Ingiriiska oo waxay ka caawisaa inay dugsiyada go'aansadaan adeegyada taageerada luuqada Ingiriiska ee ay bixinayaan. Waxaad isticmaali kartaa warbixinta imtixaanka si ay ugu doodaan canugaaga ee dugsiga.

## U diyaar garowga WIDA Alternate ACCESS

- Canugaaga uma baahno inuu barto WIDA Alternate ACCESS Beddelka ah. Imtixaanka waa fursad ay ardayda ku muujiyaan dhammaan siyaabaha ay u fahmayaan oo ay ugu xiriiri karaan af Ingiriis.
- Ka raadi tusaalooyinka su'aalaha imtixaanka WIDA Alternate ACCESS ee bogga Tusaalaha Alternate ACCESS ee websaydka WIDA, [wida.wisc.edu/assess/alt-access/preparing/practice](https://wida.wisc.edu/assess/alt-access/preparing/practice).
- U diyaar garow maalinka imtixaanka adoo hubinayo in canugaaga helo hurdo badan oo quraxdo.
- Kala hadal macalimiinta canugaaga goorta aad heleysid buundooyinka imtixaanka, sida dugsiga canugaaga u isticmaalo buundooyinkaas, iyo sida qoyskaaga ugu taageeri karo guriga hormarka luuqada canugaaga.

### Su'aalaha aad weydiin kartid macalimiinta canugaaga

- Sidee ayaa loo diiwaangelinayaa oo loo raadraacayaa yoolalka hormarka luuqada Ingiriiska canugeyga?
- Goorma ayuu canugeyga qaadanayaa WIDA Alternate ACCESS?
- Goorma ayaan helayaa buundooyinka imtixaanka canugeyga ee WIDA Alternate ACCESS?
- Sidee ayaa buundooyinka imtixaanka loo isticmaalaa si ay uga caawiso in canugeyga hormar ku sameeyo waxbarashada tacliinta Ingiriiska?
- Sidee ayaad u ogaansataan goorta canugeyga helayo adeegyada luuqada Ingiriiska?

